Kitaabka

Axkaamta Soonka

Oo kooban

Waxaa dhigay

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Kitaabka

Axkaamta Soonka

Oo kooban

Waxaa dhigay

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan

Tusmada kitaabka

Mawduuca	Bogga
1. Tusmada Kitaabka	3
2. Niyyah/Niyada	4
3. Maxaa loo soomayaa?	4
4. Yaa soomidda Ramadaan lagu leeyahay?	4
5. Tiirarka soonka	5
6. Sida soonka loo xirto	5
7. Suxuurta	5
8. Afurka	5
9. Yaa loo ruqseeyey cunidda maalin Ramadaan oo qallaynaya?	6
10. Dadkay afuriddu waajib ku tahay iyo qallayntuba	6
11. Dadka afuridda loo ruqseeyey oo fidyo waajib ku tahay	6
12. Cibaadaysiga maalinta Ramadaan	7
13. Cibaadaysiga habeenka Ramadaan	7
14. Waxyaalkaan soonka burin	8
15. Buriyayaalka soonka oo qallayn waajibinaya	8
16. Buriyayaalka qallayn iyo kafaaro gud waajibinaya	8
17. Zakada soonfur	8
18. Salaadda taraawiixda	9
19. Ducada qunuutka	9
20. Ducada qunuutka macneheeda	10
21. Ducada afuridda dabadeed	10

Neyyah/Niyada

Al Bayhaqii iyo Daaruqudhniyyu iyo ghayrkoodba waxay ka wariyeen Caa'ishah inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"man lam yabiiti al ssiyaama qabla al fajri fa laa siyaama lahu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Qofkaan niyeeysan inuu soomo maalintaas intuusan waagu baryin ka hor, maalintaas soon ma laha." Taasi waxaa weeyey inuu habeenka ka horreeya niyeeysto soomidda maalinta ku xigta. Hadduusan niyeysan soonkiisa ajar laga siin mayo (Al Bayhaqii mujalladka afaraad bogga laba boqol iyo saddex; Al Majmuuc ee Imaam al Nawawee mujalladka lix, boogga laba boqol saddex iyo sagaashan). Al Bukhaarii wuxuu Cumar ka wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Innamaa al acmaalu bi al nniyaati, wa innamaa lu kulli imri'in maa nawaa"**, oo macnihiisu yahay: "Acmaasha waxaa la isaga ajar siiyaa waxa loo niyeeystay, qof walbana wuxuu leeyahay ajarka wuxuu niyeystay." (Al Bukhaarii: Xadiithka koowaad)

.

Bilowga iyo dhammaatka Ramadaan

Waxaa ina soo haysa Bishii Barakaysnayd ee Ramadaan ama Soonqaad, oo Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, muslimiinta soonta oo dambi dhaaf weydiisata uu damigay hore u galeen ka dhaqo. Bilawga Ramadaan wuxuu ku beegan hadba goorta bisha dhalatay la arko, wuxuuna dhammaanayaa goorta bisha ku xigta ee Shawwaal la arko, sida ugu sugnaatay Xadiithkuu Muslim, waana Xadiithkiisa kun iyo sideetan, Abuu Hurayrah ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"suumuu li ru'yatihi wa afdhiruu li ru'yatihi, fa in ghummiya calaykum fa akmiluu al cadada."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "waxaad soontaan markaad bisha aragtaan, waxaadna afurtaan oo soonqaad ku dhammaysaan markaad bisha ku xigta aragtaan. Hadduu cirku daruuro leeyahay oo aad dayaxa arki waydaanna maalmaha bisha, waana Shacbaan iyo Ramadaan, dhammaystira oo soddon maalmood ka tiriya."

Maxaa loo soomayaa?

Waxaa loo soomayaa maxaa yeelay Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, ayaa na amray, siday noo sheegtay Aayadda boqol shan iyo sideetan ee Suuratul Baqaraha: "**Faman Shahida minkum al sh-shahra falyasumhu**(185)", oo macneheedu yahay: "Ee qofka adinka idinka midka ah oo jooga ha soomo(185)". Soonku waa tiirka afaraad ee islaamka siduu Al Bukhaarii Cumar uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Al Islaamu an tash-hada an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi , Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wa tuqiima al ssalaata, wa tu'tii al zzakaata, wa tasuuma ramadaana, wa taxujja Al Bayta, ini istadhacta ilayhi sabiilan."**

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Islaamku waa
(Kow) inaad ka markhaati kacdaa inuusan jirin ilaah aan Ilaahay ahayn iyo inuu Nabi Muxammad, Rasuulka Ilaahay yahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
(Laba) Inaad shanta salaadood oogtaa.
(Saddex) Inaad zakadana bixisaa.
(Afar) Inaad bisha ramadaanna soontaa.
(Shan) Inaad Baytkana u xajjidaa haddaad tegi kartid."

Yaa soomidda Ramadaan lagu leeyahay?

Soomidda Ramadaan waxay waajib ku tahay qof kasta oo muslim ah, qaan gaar ah, caqli taam ah leh.

Tiirarka soomidda

Tiirarka uu soonku ku taaganyahay, oo la'aantood uusan ansaxayn waxaa weeye: (Kow) inuu qofku niyeysto inuu berri soomo iyo (Laba) afhaysasho uu ka af haysto cunno, cabid, isla gogol gal, hadal aan khayr ku jirin, beenta, xanta iyo inta xun oo idil, laga bilaabo Salaadda Subax ka hor ilaa Maghribka laga tukado.

Sida loo xirto

Waxaad soonka ku xirataa adigoo tiraahda: **"Nawaytu Sawma ghadin adaa-an can fardi sharhra Ramadaana haathihi al ssanati iimaanan wa ixtisaaaban li-Allaahi Tacaalaa**, oo macnihiisu yahay: "Waxaan niyeystay soomidda berrito anigoo gudanaya fardiga bisha Ramadaan ee sanadkaan Ilaahay Tacaalaa daraadiis!" (Fiiri Al Majmuuc by Imaam Al Nawawee, mujalladka 6, bogga 299; mujal. 1, bogagga 375,380, 396).

Suxuurta

Suxuurta barako ayaa ku jirta, ee ha la suxuurto, inta dib loo dhigi karana ha loo dhigo. Muslim wuxuu Anas ka wariyay, waana Xadiithkiisa kun shan iyo sagaashan, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri: **"tasaxxaruu fa inna fii al ssuxuuri barakah"**, oo macnihiisu yahaya: "suxuurta maxaa yeelay suxuurta waxaa ku jirta barako", oo soomidday xoog kuu siinaysaa. Waxaana wariyay Muslim, waana Xadiithkiisa kun shan iyo sagaashan. Muslim wuxuu wariyay in Caa'ishah lagu yiri: "Cabdu Allaahi wuxuu dedejiyaa afurka, suxuurtana dib ayuu u dhigaa! Waxay tiri: "Sidaasuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yeeli jiray." Waana Xadiithka Muslim ee kun sideed iyo sagaashan. Al Bukhaarii iyo Muslim waxay wariyeen inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"laa tazaalu ummatii bi khayrin maa cajjaluu al fidhra."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "ummaddaydu khayr ayay ku sugan tahay intay afurka dedejinayaan." Axmad wuxuu ku daray inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri: **"wa akh-**

kharuu al ssuxuura", oo macnihiisu yahay: "iyo intay suxuurtana dib u dhigayaan." Waqtiga suxuurtu wuxuu dhammaanayaa markay noo sheegtay Aayadda boqol toddoba iyo sideetan ee Suuratu Al Baqarah: **"Wa kuluu wa ishrabuu xattaa yatabayyana lakumu al khaydhu al abyadu mina al khaydhi al aswadi**(187)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye: "cunnadana cuna cabbana ilaa jeer ay idiin kala caddaadaan dunta cad iyo dunta madow, oo ah habeenka iyo maalinta, waana waaga dillaaciisa(187)." Al Bukhaarii, waana Xadiithkiisa kun sagaal boqol kow iyo labaatan, iyo Muslim, waana Xadiithkiisa kun shan iyo sagaashan, waxay ka wariyeen Anas oo ka wariyay Zayd bin Thaabit oo yiri: "waxaan la suxuurannay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kaddibna salaadda (subax) ayaan u istaagnay." Waxaan iri: "qadarka waqtiga markaad suxuurateen iyo markaad salaadda u istaagteen u dhexeeyey meequu ahaa?" Wuxuu yiri: "inta konton Aayadood la akhriyo."

Afurka

Afurka waa la dedejiyaa, oo markii la aathaamo hore ayaa laga afuraa intaan la tukanba, markaas kaddib ayaa makhribka la tukadaa. Axmad wuxuu wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri**: "Laa tazaalu ummatii bi khayrin maa cajjaluu al ifdhaara wa akh-kharuu al ssuxuura"** oo macnihiisu yahay: "ummaddaydu waxay ku sugantahay khayr intay afurkana dedejineyso, suxuurtana dib u dhigayaan." Waxaana suuban inuu qofku timir ku afuro, haduu waayana biyo. Al Bukhaarii wuxuu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyay, waana Xadiithkiisa kun sagaal boqol afar iyo konton, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"ithaa aqbala al llaylu min haahunaa wa adbara al nnahaaru min haahunaa wa ghaabati al sh-shamsu min haahunaa fa qad afdhara al ssaa'imu."** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "markuu habeenka dhinacaan ka yimaado, maalintuu ay dhinacaan u gaddoonto qorraxduna ay dhinacaan u dhacdo markaasuu qofka soomani afurayaa."

Yaa loo ruqseeyey inuu maalin Ramadaan afuro oo qallaynaya?

Waxaa loo oggolyahay inuu maalin soonqaad cuno qofka jirran iyo qof musaafir ah oo socdaal ku jirah.

Dadkay afuriddu waajib ku tahay iyo qallayntuba

Haweenta dhiigga caadada qabtah iyo haweenta dhiigga dhalmada qabta waxaa ku waajib ah inay cunaan maalin Ramadaan, oo looma oggola inay soomaan. Inta maalmood ay cuneen ayay qalleynayaan.

Dadka Afuridda loo ruqseeyey oo ay fidyo ku waajibtay

Waxaa loo ruqseeyey inay maalin Ramadaan afurnaadaan, ayagoo soomiddu dhib iyo mashaqo ku tahay, oo inay fidyo ama furasho bixiyaan lagu waajibiyay qofka gaboobay oo da'diisu weynaatay, qofka bukah oo aan bogsashadiisa laga rajo qabin, haweenta uurka leh iyo haweenta cunug nuujinaysa hadday cunugga uurka ku jira ama midka nuugaya ay u cabsadaan. Fidyada lagu leeyahay oo ay bixinayaan waa inay maalin walba oo ay afureen, qof miskiin ah cunno siiyaan, cunnadaasoo u dhigantah nus kiilo badar ah ama bariis, ama nus liitar caano ah, ama wax u dhigmah ama qiimohooda oo lacag ahaan loo bixiyo.

Cibaadeysiga maalinta Ramadaan

Waxaa la badiyaa Alle la xiriirsiga, akhrinta iyo barashada Quraanka, bixinta sadaqada, Alle bariga, dambi dhaaf weydiisashada iyo khayr falidda.

Cibaadeysiga habeenka Ramadaan

Salaadda Cishaha ka dib waxaa la tukadaa Salaadda Taraawiixda, oo Masaajidyadana lagu tukan karo, qofka doonana uu gurigiisa ku tukan karo, gaar ahaan haweenka waxaa u khayr badan inay guryohooda ku tukadaan, salaadaha fardiga ah iyo taraawiixdaba, ayadoo uu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**: "Salaatu al mar'ati fii baytihaa afdalu min salaatihaa fii xujratihaa, wa salaatuhaa fii makhdacihaa afdalu min salaatihaa fii baytihaa"**, oo macnihiisu yahay: "salaadda ay haweentu ku tukato gurigeeda ayaa ka fadli badan salaadda ay ku tukato barsadeeda. Salaadda ay ku tukato qolkeeda jiifkana ayaa ugu fadli badan salaadday gurigeeda ku tukato." Waxaana wariyay Abuu Daauud #570 iyo Al Bayhaqii #3/131, kana wariyeen ibnu Mascuud, oo yiri: "wa Allathii laa ilaaha ghayruHu maa sallat imra'atun salaatan khayran lahaa min salaatin tusaliihaa fii baytihaa ilaa an yakuuna Masjida Al Xaraami aw masjida Al Rrasuuli, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, illaa cajuuzan fii minqalayhaa" oo macnihiisu yahay: "waxaan ku dhaartay Ilaaha uusan ghayrkiis jirin inayan haweentu tukanayn salaad uga khayr badan salaadday ku tukato gurigeeda dhexdiisa, intaana ka ahayn Al Masjidu Al Xaraamu, iyo Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intaan ka ahayn cajuuzad xiran laba khuff oo aan asal lahayn." Waxaan wariyay Al Bayhaqii. Al Majmuuc wuxuu Al Bayhaqii ka wariyay inuu Curwah bin Al Zzubayru sheegay inuu Imaam Caliyyu bin Abii Dhaalib, Allaha raalli ka noqdee, uu raggana Ubayya bin Kacb imaam salaadda taraawaiixda uga dhigay isagana uga dhigay imaam haweenka. Waxaa ninkeeda u habboon ina hadday haweentiisu uga idan qaadato inay masjidka salaad kusoo tukato inuu u idmo hadday tahay cajuuzad uusan ninna damcayn oo laga amni helayo fasaad ayada iyo ghayrkeedba daraadeed ugu dhaca. Inuu masjidka tegiddiisa ka reebana ka xaaraan ma aha. Kaas weeye math-habkeennu, ayna guud ahaan culummaduba yiraahdeen. Haddayse tahay haweeney da' yar ama weynba lase damcayiba karo, waa u

karaahiyo iyo wax la kahdo inay masjid tagto, ayadoo ragga fasaad u keeneysa, siduu ku yiri Al Majmuuc 5/169.
Waxaa kale oo habeen barka habeenka Ramadaan loo kacaa oo la tukadaa Salaadda la yiraahdo tahajjud ama qiyaamulleyl, ahna toban rakco oo laba laba loo tukanayo iyo saddex rakco oo witir ah oo marka hore labada shafciga kaddibna midda witriga la tukanayo. Gaar ahaan waxaa la cibaadeystaa habeenka Laylatul Qadriga ah. Raggu wuxuu ku ictikaafaa Masaajidyada.

Waxyaalka aan soonka burin

Waxyaalka haddii la sameeyo uusan soonku ku burin waxay yihiin: qubeyska, in indhaha la kuusho, dhunkashada (qofkii iska adag oo aan intaas u dhaafeyn), cirbad daawo ku jirto oo la isku duro, dhiig isbitaalka la isaga qaado, luqluqashada, leqidda uu qofku candhuuftiisa leqoh, inuu qofku waabariisto isagoo janaabo qabah, haddii haweenta uu habeenkii dhiiggu ka go'oh way soomeysaa, subixiina way qubeysaneysaa.

Buriyayaalka qallayn waajibinaya

Waxaa soonka buriya, oo qallayn waajibinaya: cunno kas loo cuno, cabid kas loo cabbo, is matajin ula kac ah; hadday haweentu hesho dhiigga caadada, ama dhiigga dhalmada; in qofka isagoo soo jeedah ay biyo ama mino ka yimaadaan oo aan isla gogol gelid dhacday keli ah ku imaan bal ay ku timaaddo oo kale inuu qofku isagu iska keeno biyaha, ama ay ku yimaadaan taabasho, ama la seexasho jirarku is taabtaan oo aan ka fakarid keligeed ku imaan, ama dhugasho; haddii uu qofku cuno ama cabbo isagoo u malaynayay inay qorraxdu dhacday, run ahaantiise ayan dhicin, ama cunay ama cabbay isagoo u malaynayay inuusan fajarkii saadiqa ahaa dhalan, run ahaantiise uu dhashay.

Buriyayaalka qallayn iyo kafaaragud waajibinaya

Hadday nin iyo haweentiisu maalin soon isla gogol galaan, soonkiina waa burayaa, waxaana ku waajibaysa qallayn iyo kafaaragud. Kafaaragudku wuxuu ku waajibaa ninka oo keli ah, oo u dheer qallaynta. Haweentana waxaa lagu leeyahay qallayn oo keli ah. Kafaaragudkaas waxaa weeye: inuu qof muslin ah oo adoonnimo loo haystay xoreeyo, ama laba bilood oo isku xigta uu soomo ama inuu lixdan miskiin cunno siiyo.

Zakada Soonfur

Waxay waajib ku tahay inuu bixiyo qof kasta oo muslin ah, oo haystah wax ka badan quutkiisa iyo quutka ciyaalkiisa maalinta ciidda iyo habeenkeeda. Waxaa ku waajib ah inuu ka bixiyo naftiisa, iyo inta nafaqadooda lagu leeyahay, sida haweentiisa, caruurtiisa, addoommadiisa. Zakadaas waa laba kiilo oo bur ah ama afar kiilo oo timir ah ama lacag qiimohooda u dhigantah.

Waxaa la bixin karaa maalinta uu Ramadaan dhasho ilaa maalinta Ciidda ah intaan Salaadda Ciidda la tukan. Waxaad siin kartaa, oo haboon, qaraabadaada u baahan, dal kaleba ha joogaane.

Salaadda Taraawiixda

Cishaha waxaa ka dambeeysa salaadda taraawiixda oo ah sideed rakco oo laba laba loo tukanayo, ayna ka dambeeyaan saddex rakcu oo witir ah oo marka hore laba rakco la tukanayo oo la salaama naqsanayo. Kaddibna hal rakco oo witir ah. Rakcada witirka marka rukuuca laga soo kaco waxaa lagu duceysanayaa ducada qunuutka.

Ducada qunuutka

Markaad Rakcada labaad ee Salaadda Subax rukuuca kasoo istaagtid, waana subax walba, adigoo SamicAllaahu liman Xamidahu - Rabbanaa Lakal Xamdu oranaya, labadaada gacnood kor usoo qaad, ayadoo ay calaacalahaagu kor u jeedaan, lana soo sin laabtaada, kuna duceyso ducadaan. Sidoo kale, markaad Rakcada Witirka aad tukaneysid, oo aad Rukuuca kasoo istaagtid, sidoo kale ducada Qunuutka ku duceyso. Al Xasan bin Caliyyu bin Abii Dhaalib, Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam, wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu i baray inaan qunuutka witirka ku ducaysto kalimaatkaan."
Xadiithkana waxaa wariyay Al Dayramii, waana Xadiithkiisa mujalladka koowaad boggasaddex boqol saddex iyo toddobaatan, Abuu Daauud, waana Xadiithkiisa kun afar boqol shan iyo labaatan) iyo Axmad, waana Xadiithkiisa mujalladka koowaad bogga boqol sagaal iyo sagaashan.
Al Tarmithii wuxuu yiri: "Xadiith midkaan ka saxiixsan oo ku saabsan qunuutka Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ma jiro." Al Bayhaqii wuxuu ka wariyay Muxammad Al Xanafiyyah, wiilka Caliyyu bin Abii Dhaalib, Allaha labadoodaba raalli ka noqdee inuu yiri: "Kan weeye ducada qunuutka uu aabahay ku ducaysan jirayr salaadda subax." (Al Bayhaqii mujalladka labaad bogga laba boqol sagaal. Ducaduna waa tanaa:

Allaahumma ahdinaa fiiman hadayta
Wa caafinaa fiiman caafayta
Wa tawallaanaa fiiman tawallayta
Wa baarik lanaa fiimaa acdhayta
Wa qinaa sharra maa qadayta
Fa Innaka taqdii wa laa yuqdaa CalyKa
Fa innahu laa yuthillu man waalayta
Wa laa yucizzu man caadayta
Tabaarakta Rabbanaa wa Tacaalayta
Walxamdu laKa calaa maa qadayta
Wa nastaghfiruKa Allaahumma wa natuubu ilayKa
Wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin Annabiyyi Al Ummiyyi

Wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallam
Tasliiman kathiiran.

Ducada qunuutka macneheeda

Allaahumma ahdinaa fiiman hadayta: Ilaahayow noo hanuuni sidaad dadka u hanuunisay oo kale
Wa caafinaa fiiman caafayta: Noona caafi oo noo dambi dhaaf oo na cafi sida kuwaad caafiday oo kale
Wa tawallaanaa fiiman tawallayta: Nagana mid dhig kuwaad waligooda iyo gargaarohooda tahay
Wa baarik lanaa fiimaa acdhayta: Waxaad na siisayna noo barakee oo badi
Wa qinaa sharra maa qadayta: Waxaad abuurtay shartoodana naga celi
Fa Innaka Taqdii wa laa yuqdaa calyKa: Oo Adigu Adigaa Xukun rida, Adigana xukun laguguma rido
Fa innahu laa yuthillu man waalayta: Qofkaad waliga u tahayna lama dullayn karo
Wa laa yucizzu man caadayta: Qofkaad colaadisana cizzi iyo xoog yeelan mayo
Tabaarakta Rabbanaa wa Tacaalayta: Adigaa Rabbigeenow Wayn oo Sarreeya
Walxamdu laKa calaa maa qadayta: Waxaad xukuntayna waad ku mahad santahay
Wa nastaghfiruKa Allaahumma wa natuubu IlayKa: Dambi dhaafid ayaan ku weydiisaneynna, kuuna soo noqoneynnaa
Wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin: Sidaasna Ilaahayow sayyidkeenna iyo Nabigeenna Muxammad, ugu salli
Annabiyyil Ummiyyi: Nabiga ummiga ah
Wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallam: iyo Aalkiisa iyo asxaabtiisa,
Tasliiman kathiiran: salaanna salaan badan

Kaddib, Sujuud u dego oo Salaadaada dhammeystir, adigoo laba sujuudood la imaanaya, Attaxyaatka akhrinayaa, kaddibna salaamo naqsanayaa.

Ducada afurka kaddib

Abuu Daauud wuxuu Mucaath bin Zuhrah ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhe Wasallam, kaddib markuu afuray yiri: **"Allaahumma laKa Sumtu wa calaa rizqika afdhartu".** Ducada macneheedu waxaa weeye: "Ilaahayow daraadaa ayaan u soomay, rizqigaaga aad i siisay ayaanna ku afuray" (Abuu Daauudd #2358, al Bayhaqee 4/239). Abuu Daauud wuxuu wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, kabbib markuu afuray uu yiri: **"Thahaba al tham-u wabtallati al curuuqu wa thabata al ajru in shaa-a Allaahu Tacaalaa".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Harraadkii waa tegey, xididaduna way buuxsameen oo harraad baxeen, ajarkiina wuu sugnaaday inshaa'a Allaahu Tacaalaa." Waxaa wariyay Abuu

Daauud, waana Xadiithkiisa laba kun saddex boqol toddoba iyo konton, iyo Al Bayhaqii mujalladka koowaad bogga laba boqol sagaal iyo sodoon.

Wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa wa Shafiicinaa Muxammadin wa calaa Aalihi wa Saxbihi wa Sallaam tasliiman kathiiran.